



# Soo-koobitaanka Jawaab-celiska Dib-u-habaynta Yesler Terrace Kulan-hawleedka 1 | Ku-noolaanshaha Jawi Madani ah Ogost 5, 2008

Ogost 5, 2008 Kulan-hawleed dadweyne ayaa loogu qabtay sarta Jesse Epstein dadka deggan Yesler Terrace.

Mawduuca guud wuxu ahaa suurtagalnimada nolosha madaniga ah. Booqasho kormeer oo rasmi ah ayaa lagu sameeyey Yesler Terrace-ka mustaqbalka taas oo ah sawiro deegaano hadda caalamka ka jiran oo leh qaab madani ah. Sawiradaas waxa loommma soo gudbin qaab soo-jeedin ah, ee laakiin u dhigan suurtagalnimo. Sawiradaasi waxay ka tarjumayaan waxyaabaha laga qabanayo caalamka. Kadib markii fikradaha la soo bandhigay, dadka xaafadda waxa la weydiyey inay ra'yigooda ka soo dhiibtaan waxay jeclaysteen iyo waxaanay jeclaysan.

Maxaad ka jeclaystay fikradihii la soo bandhigay?

1. Suuqa beeralayda.
2. Suuqa bacadlaha ee farshaxanka hiddaha iyo xirfadaha.
3. Soo-saarka tamarta cadceedda iyo habka qashinka loo maareeyo ee “anaerobic digesters”.
4. Farshaxanka dadweynaha.
5. Meelaha la lugeeyo, jidadka.
6. Garoomada ciyaaraha.
7. Dhul u banana beero qof ahaaneed, beeraha saqafka dushiisa.
8. Biyaha-roobka, ururinta si loogu waraabiyo beeraha iyo meelaha biyaha ee dadweynaha.
9. Dukaano yaryar oo ka hooseeya saraha guryaha.
10. Suuqa-weyn ee Safeway.
11. Gargaarka fuulitaanka buurta.
12. Qubayska Naafoda.
13. Meesha lagu dabaasho.
14. Badhanka digniinta.
15. Laydhka jidka (mar haddaanu soo galayn gurigaaga).

Waa maxay fikradaha aanad jeclaysan?

1. Beeraha saqafka dushiisa.
2. Badhanka fejjignaanta haddii aanu ku xidhnayn waaxda boolisska.
3. Large concrete plazas, fear that it will be used as a walking path rather than a social lingering place.
4. Tall buildings.
5. Small business in the home.

Ahmiyadaha:

1. Qiimaha iijaarka ee dhismaha cusub ee dadka leh ganacsiyada yaryar.
2. Lumitaanka muuqaalka dhismaha dheer awgeed.
3. Garoonka bannaan oo aan hadda cidi isticmaalin.
4. Qaabka guryaha: qubays loogu talagalay dadka naafoda ah, musqulo ku filan tiro dad ah guri kasta, qolal waaweyn.

